

Warbixin ku saabsan (caabuqa qarsoon) daaweynta cudurka tiibishada.

Waxaa lagaa helay tiibishada qarsoon. Dhaqtarka ku daaweynaya ayaa kuu doortay daawooyinka Daryeelka ujeeddiisu waa in jirkaaga laga baabi iyo dhammaan bakteeriyada tiibishada, aysanna kugu dhicin markale. Daaweyntu waa, haddii aad dooneyso ood ballan qaadeysid daaweynta. Daaweyntu sida uu sharcigu dhigayo macmiilka waa u lacag la`aan ama bilaash.

Tiibishada qarsoon waxaa lagu daaweeyaa 1-2 daawo oo laysku daray.

- Isoniatsidi (Tubilysin®) 300 mg kaniini
- Rifampisiini (Rimapen®) 600 mg kaniini ama
- Rifapentiini (Priftin®) 150mg kaniini

Waqtiga daaweynta hadba waxa ay ku xiran tahay daawooyinka laysku dhafay. Badanaa daaweynta waxa ay qaadataa 3-9 bilood. Daawooyinka waxa laga soo qoraa rugta bukaan socodka ee isbitaalka ha noqoto farmashiyaha lagu heshiiyey ama warqadda daawada lagu qoray oo loo gudbiyey farmashiyaha isbitaalka.

Waa in lala socdaa wada isticmaalka daawooyinkan iyo isticmaalka daawooyinka kale iyo kuwa dhirta dhibaatooyinka ay yeelan karaan. Sidaa darteed waa in aad sheegtaa dhammaan daawooyinkaaga oo dhan.

Daawooyinka waxa ay keeni karaan dhibaatooyin.

Inta badan dhibaatooyinka ay daawooyinku leeyihiin waa mid fudud, waana ay dhammaanaya marka daawooyinka isticmaalkooda la sii wado, ama in loo helo xal fududeeya.

Rifampisiini iyo rifapentiini

- Kaadida, candhuufta, dhididka, iyo illinta waxa ay isku baddalayaan midabka oranjiga. Arrintan ma aha mid dhib ah, laakiin muraayadaha indhaha gudahooda la galiyo lama isticmaali karo, midabka illinta isbaddalkooda darteed.
- Kaniiniga uurka celiya waxtarkooda wuu yaraanayaa, sidaa darteed inta aad daawooyinka isticmaaleysid haddaan uur dooneynin isticmaal waxyaalaha kale ee uurka celiya.
- Waxaa laga yaabaa in markaad isticmaasho daawada Rifampisiini 2-3 saacadood ay kuutimaado wajiga iyo madax oo ku casaada kuna cun cuna. Calaamadaha waxaa lagu daweyn karaa antihistamiinada (daawooyinka xasaasiyadda).

Isoniatsidi

- Waxa laga yaabaa inay keento dhaawac khafiif ah oo dareemaha durugsandhaawac, oo ay ka muuqato kabuubyo gacmaha iyo lugaha ah, xanuun, ama dareen jiririco. Waxaana kuwaas looga hortagi karaa adoo qaata fiitamiinka B6
- Waxa laga yaabaa inuu keeno wajiga oo ku casaado iyo madax xanuun, mar mar dhif ahna miyir beelid. Tan waxa u sabab ah tyramine iyo histamine ee ku jira cuntooyinka qaarkood. Iska ilaali kuwan: farmaajo la bisleeyey, khamri cas, kalluunka tunaha, makkaraha hilibka doonfaarka laga sameeye (Salami).

- Finanka wajiga ayaa ka sii dari kara. Tan waxaa lagu daweyn karaa alaabada daaweynta finanka la mariyo.
- Waxaa laga yaabaa in timaha kaaga gurmaan si kabadan sida caadiga ah. Marka ay daryeelka daawadu dhammaato arrintu waa ay wanaagsanaaneysaa.

Daawooyinka tiibishada waxay sababi karaan in beerka barar ku dhaco, sidaas darteed baaritaanada beerka waxaa loola soconayaa in dhiig la qaado inta lagu jiro daawaynta.

- Calaamadaha waxaa ka mid noqon kara lallabbo, matag, ama calool xanuun. Barootiinka ku jira maqaarka iyo indhaha ayaa laga yaabaa inuu huruud ama jaale isu beddelo. Bararka beerka waxaa laga yaabaa in uusan calaamado xanuun, laakiin waxaa lagu ogaan karaa dhiigga marka lagaaqaado.
- Isticmaalidda khamriga wax uu sii badinayaa qatarta bararka beerka. Iska ilaali isticmaalka khamriga inta aad daawada qaadanaysid.

Calaamadaha khafiifka ah, la xiriir dhakhtarka si loo qiimeeyo xaaladaada:

- Cuncunka jirka ee keena barbararka (cudurka urikaia)
- Labalabo, shuban iyo cunto xumo
- Gacmaha iyo lugaha oo ku kabaabyooda, ku xanuuna, dareentid durdurniin (hubso in aad qaadatay fitamiin B6)
- Hurdo-xumada, niyad-jabka, feeyignaan la`aan, dawakhaad.

Hadday yimaadaan calaamadaha qatarta ah waxaa la joojinayaa daawooyinka. Isla markiiba la xiriir dhakhtarkaaga ama aad qaybta gargaarka degdegga ah:

- Matagiddaiyo calool xanuunka daran
- Cadaanka indhaha ama maqaarka ayaa huruud noqda
- Qandho iyo jir cuncun
- Kaadida ayaa ka yar sidii caadiga ahayd, midabka kaadida ayaa aad u madow noqda
- Aragtida oo yaraato
- Qalal gacmaha iyo lugaha oo kusoo togma
- Arakti ama maqal dhalanteed ah
- Fikir ah in aad is disho, niyaddaada oo marwalba si aad ah isu badasho
- Dhiigbax aan caadi ahayn oo ka imanaya cirridka ama sanko.

Maxaa kale oo aad dooneysaa in aad ogaado?

Daaweyntu waxa ay ka celinaysaa in tiibishada sii fiddo intabadan dadka daawooyinka qaatay. Si kastaba ha ahaatee, la soco caafimaadkaaga. La xidhiidh dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto qufac dheer, xab, xaako, cunto xumo, miisaan lumis, daal daran, ama dhidid habeenkii ah.

Ka aqriso macluumaad dheeraad oo tiibishada ah: www.tuberkuloosi.fi